

English	Somali	File name
<p>Summary guide - In our own words African Australians: A review of human rights and social inclusion issues</p>	<p>Tusaha kooban-Haddalkayaga Afrikaanka Australiyaanka ah: Dib u eegida xuquuqda aadana iyo arimaha bulsho ku darida</p>	<p>Somali-File1.mp3</p>
Introduction	Horudhac	Somali-File2.mp3
<p>African Australians have so much to contribute to the Australian society, but this can only happen when there is a sense of belonging, when people feel part of this country, when they call this country home. Community consultation, South Australia</p>	<p>Afrikaanka Australiya waxay leeyihiin wax badan oo ay ka tari karaan bulshada Australiya, laakiinse tani waxay dhici kartaa oo keliya markuu jiro dareen lahaansho, marka dadku dareemaan qayb inay ka yihiin dalkan, markay dalkan ugu yeeraan inuu yahay gurigoodii. Latashiga bulshada , ee Koonfurta Australiya</p>	
<p>There is a long history of migration between Africa and Australia – however in recent years, it has accelerated.</p>	<p>Waxaa jirta taariikh aad u dheer oo ka dhaxeysa socdaalka Afrikaanka iyo Australiya- si kastaba ha ahaatee sannadihii ugu danbeeyey, way xooggeysatay.</p>	
<p>In 2006, a total of 248,699 people born in Africa were living in Australia. This represents 5.6% of Australia's overseas-born population and around one per cent of the country's total population. Since then, around 50,000 more migrants born in Africa have arrived in Australia.</p>	<p>Sannadkii 2006, wadar dhan 246,699 oo qof oo Afrika ku dhashay ayaa ku noolaa Australiya. Tani waxay u dhigantaa 5.6% oo ah tirada dadka australiyaanka ah ee ku dhashay dibeda iyo meelahaas boqolkiiba hal wadarta tirada dalka. Ilaa iyo wixii ka danbeeyey wakhtigaas, qiyaastii 50,000 wax ka badan oo ah soogalooti ku dhashay Afrika ayaa yimid Australiya.</p>	
<p>They come from nearly all countries on the African continent and represent a great diversity of cultures, religions and language groups.</p>	<p>Waxay ka yimaadeen ugu dhawaan dhammaan dalalka qaarada Afrika waxayna metelayaan dhaqamo weyn oo kala duwan, diimo iyo kooxo luuqadeed.</p>	
<p>In December 2007, the former Race Discrimination</p>	<p>Diiseembar 2007 dhexdeeda, Guddoomiyihii hore ee</p>	

Commissioner Tom Calma launched a project to build a national picture of the lives and experiences of African Australians.	Kala sooca Jinsiyada Tom Calma wuxuu shaaca ka qaaday mashruuc lagu dhisayo sawirka qaran ee nololaha iyo waayo aragnimada Afrikaanka Australiyaanka ah.	
The aims of the project were to:	Ujeedooyinka mashruucu waxay ahaayeen in :	
<ul style="list-style-type: none"> identify what can help – and what can hinder – the settlement and integration experiences of African Australians 	<ul style="list-style-type: none"> la helo waxa caawin kara – iyo waxa hor istaagi kara – degitaanka iyo isdhexgalka Afrikaanka Australiyaanka ah. 	
<ul style="list-style-type: none"> suggest practical solutions to guide the development of policies, programs and services for African Australians, as well as broader community education initiatives 	<ul style="list-style-type: none"> xalalka rasmiga ah ee lagu talinayo in lagu hago siyaasada horumarinta, barnaamijyada iyo adeegyada dadka afrikaanka Australiyaanka ah, iyo sidoo kale bilowyada waxbarashada bulsha weynta 	
<ul style="list-style-type: none"> address some of the stereotypes about African Australians that had been raised in public debate and media reporting. 	<ul style="list-style-type: none"> Ka hadlida qaar ka mid ah waxyaalaha la aaminsanyahay ee ku saabsan dadka Afrikaanka Ausraliyaanka ah ee lagu soo qaaday doodaha dadweynaha iyo warbixinta warbaahinta. 	
While this project is not the first to draw attention to the challenges facing African Australians, it does – for the first time – consider these issues from the viewpoint of African Australians , from a national perspective and within a human rights context .	Mashruucani ma aha kii ugu horeeyey ee uu soo jiito loolanka ku wajahan dadka Afrikaanka Australiyaanka ah, wuxuu sameynayaa wakhtigii ugu horeeyey – inuu tixgeliyo arimahan dhinaca aragtida dadka Afrikaanka Australiyaanka ah, dhinaca qaranka iyo dhinaca xuquuqda bani'aadamka ahaanba .	
Just as importantly, the project sought to gather their suggestions to bring about positive change. It also documents the many creative and successful initiatives that have been established by African Australian communities and other organisations to address specific challenges and promote social inclusion.	Sida uu muhiimka u leeyahay, mashruucu wuxuu raadinayaa inuu ururiyo fikradahooda si uu u keeno isbedel wanaagsan. Wuxuu sidoo kale dukumiintigareynayaa bilowyada lagu guuleystay ee fara badan iyo hal abuurkaba ee ay sameeyeen bulshooyinka dadka Afrikaanka Australiyaanka ahi iyo ururada kale si ay uga hadlaan loolamada khaaska ah iyo kor u qaadida ku darida bulshada.	

About the project	Wax ku saabsan mashruuca	Somali-File3.mp3
<p>African Australians: Human rights and social inclusion issues was one of several projects undertaken by the Commission under its Community Partnerships for Human Rights program. It was largely funded by the Australian Government, as part of the National Action Plan to Build on Social Cohesion, Harmony and Security.</p>	<p>Afrikaanka Australiyaanka ahi: xuquuqda bani'aadamka iyo arimaha ku darida bulshada waxay ahayd mid ka mid ah dhawr mashruuc oo uu sameeyay Goluhu isagoo hoos imanayey shirkonimadiisa bulshada ee barnaamijka xuquuqda bani'aadamka. Waxaa badiba maalgeliyey dawlada Australiya, ka qayb ahaan Qorshaha Ficilka Qaran ee lagu dhisayo Nabadgelyada, Wanaag ku wada noolaanshaha iyo Wadajirka Bulshada.</p>	
<p>The project was established with the following partner organisations, which contributed knowledge, expertise and financial resources:</p>	<p>Mashruuca waxaa lala sameeyey ururadan soo socda oo shirko la ahaa, oo kaga qaybqaatay aqoon, khibrad iyo ilo lacageed:</p>	
<ul style="list-style-type: none"> • Adult Multicultural Education Services (Victoria) 	<ul style="list-style-type: none"> • Adeegyada Waxbarashada Dhaqamada badan ee Dadka waaweyn 	
<ul style="list-style-type: none"> • Australian Red Cross 	<ul style="list-style-type: none"> • Laanqeyrta cas ee Australiya 	
<ul style="list-style-type: none"> • Diversity Health Institute 	<ul style="list-style-type: none"> • Machadka Caafimaadka Kala duwannaanta 	
<ul style="list-style-type: none"> • Migrant Resource Centre of South Australia 	<ul style="list-style-type: none"> • Xarunta Ilaha macluumaadka Soogalootiga ee South Australia 	
<ul style="list-style-type: none"> • Australian Government Department of Families, Housing, Community Services and Indigenous Affairs. 	<ul style="list-style-type: none"> • Dawlada Australiya Wasaaradda Qoysaska, Guriyeynta, Adeegyada Bulshada iyo Arimaha Dadka Dhulka loogu yimid. 	
<p>Over the course of the project, the Settlement Council of Australia and the Australian Government Department of Immigration and Citizenship also joined as project partners.</p>	<p>Intii uu socday mashruucu, Golaha dejinta ee Australiya iyo Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada ee Dawlada Australiya ayaa sidoo kale ku soo biirey shirko ahaan mashruucan.</p>	
<p>Representatives from each organisation were part of a project Steering Committee, which also included two African Australian community representatives.</p>	<p>Wakiilada urur kasta waxay qayb ka ahaayeen guddiga Hogaaminta mashruuca, oo sidoo kale ay ku jireen laba wakiil oo bulshada Afrikaan Australiyaanka ah.</p>	
<p>The project also had significant input from the</p>	<p>Mashruuca sidoo kale wuxuu lahaa wax ka geysasho</p>	

<p>national Community Reference Group, made up of over 100 African Australian community members from around the country.</p>	<p>muhiim ah Kooxda Tixraaca Bulshada ee qaranka, oo ka koobneyd 100 xubnood oo bulshooyinka Afrikaanka Australiyaanka ah ee dalka oo dhan ka socda.</p>	
<p>The Commission released a Discussion Paper in March 2009, which called for submissions from African Australians, service providers, other stakeholders and the public. It was translated into 10 community languages and invited responses on five key issues: training and employment, education, health, housing and justice.</p>	<p>Goluhu wuxuu soo saarey Warqadii Wadahadalka Maarso 2009, taas oo ka dalbeysay wax u soo gudbin afrikaanka Australiyaanka ah, adeeg bixiyayaasha, kuwa kale ee daneynaya iyo dadweynahaba. Waxaa lagu turjumay 10 luuqadood oo bulshadeed iyo jawaabaha la martiqaaday ee shanta arimood ee ugu muhiimsan: tababar iyo shaqo, waxbarasho, caafimaad, guriyeyn iyo caddaalad.</p>	
<p>During the project:</p>	<p>Mashruucu intuu socday</p>	
<ul style="list-style-type: none"> • over 2,500 African Australians took part in 50 community meetings held around the country, including workshops conducted in regional locations in NSW, Victoria and SA 	<ul style="list-style-type: none"> • wax ka badan 2,500 oo Afrikaanka Australiyaanka ah ayaa ka qaybqaatey 50 kulamada bulshada ee lagu qabtay dalkoo dhan, oo ay ku jiraan hoosooyinka lagu qabtay goobaha gobolada NSW, Fiktooriya iyo SA 	
<ul style="list-style-type: none"> • representatives from over 150 government and non-government stakeholders and service providers participated in the consultations 	<ul style="list-style-type: none"> • wakiilada ka socday wax ka badan 150 ah dawlada iyo kuwa aan dawlada ahayn iyo adeeg bixiyayaasha ayaa ka qaybgalay wada tashiyada. 	
<ul style="list-style-type: none"> • the Commission received over 100 submissions (written and oral). 	<ul style="list-style-type: none"> • Guddigu wuxuu helay wax ka badan 100 fikrad soo gudbinood (qoraal iyo afka) 	
<p>Focus groups heard first-hand from African communities, in particular, young African Australians, African Australian Muslim communities and African Australian Muslim women. In addition, there were forums to identify good practice approaches; local government and community forums; multi-faith forums; an Indigenous and African communities forum; a policing and communities forum; a</p>	<p>Kooxaha ka baaraandega waxay ka maqleen akhbaartii markii ugu horeysay bulshooyinka Afrikaanka ah, gaar ahaan dhalinyarada Afrikaanka Australiyaanka ah, bulshooyinka Muslimka Afrikaanka Australiyaanka ah iyo dumarka Muslimka Afrikaanka Australiyaanka ah. Waxaa taas sii weheliya, waxaa jiray fikrad isweydaarsiyo lagu ogaanayo tallaabooyinka waxqabad ee ugu</p>	

<p>community arts forum; and a sporting organisations forum.</p>	<p>wanaagsan; dawlada hoose iyo fikrad isweydaarsiga bulshadu; fikrad isweydaarsiga diimaha badan; iyo fikrad isweydaarsiga bulshooyinka Afrikaanka ah iyo Kuwa dalka loogu yimid; fikrad isweydaarsiga bulshada iyo siyaasad sameynta; fikrad isweydaarsiga fanka bulshada; iyo fikrad isweydaarsiga ururada cayaaraha.</p>	
<p>A number of key principles informed the project, including the importance taking a 'strengths based' approach, being 'solutions focused' and promoting The First Voice of African Australian communities.</p>	<p>Tiro ah xeerarka ugu muhiimsan ayaa soo wergeliyey mashruucan, oo ay ka mid yihiin muhiimada lagu qaadayo tallaabo 'kusaleysan xooggaga', oo ah 'mid xoogga saareysa xallalka' iyo kor u qaadida Codkii ugu horeeyey ee bulshooyinka Afrikaan Australiyaanka ah.</p>	
<p><i>There is so much that has been said about Africans in the last couple of years, but if you look at who is writing it, it is often done from the perspectives of everyone but African Australians ... What a difference it will make if it is our voices that appear and our voices that are listened to.</i></p>	<p><i>Waxaa sidoo kale jira wax badan oo laga yiri Afrikaanka labadii sanno ee ugu danbeeyey, laakiinse haddii aad eegto cidda qoreysa waxaa badanaa laga sameeya arigtida qof kasta laakiinse Afrikaanka Australiyaanka ah.... Waa maxay kala duwanaanta ay sameysnayso haddii ay ahaan lahayd codkeena ka soo baxa iyo codkeena oo ah ka la dhageysto.</i></p>	
<p>Community leader, Victoria</p>	<p>Hogaamiyaha bulshada, Fiktooriya</p>	
<p>The First Voice concept¹ has its origins in the heritage conservation and museology; however it is now more widely applied as both a process and principle. The First Voice involves consultation on the basis of respect and equality, collaboration on the basis of ownership and participation, and action on the basis of substantive equality.</p>	<p>Fikrada ah Codkii ugu Horeeyey 1 wuxuu asalkiisu ka soo jeedaa wada sheekeysigii hidaha iyo madxafka sida loo sameeyo; si kastaba ha ahaatee hadda waxaa si aad ah loo isticmaalaa labadaba xeer ahaan iyo nidaamba. Codka ugu horeeya wuxuu ku lug leeyahay wada tashiga isagoo lagu saleynayo xushmada iyo sinaanta, wadashaqeynta iyadoo lagu saleynayo lahaanshaha iyo ka qaybqaadashada, iyo</p>	

¹ A Galla, 'The First Voice in Heritage Conservation', (2008) 3 *International Journal of Intangible Heritage* p 1.

	falka oo lagu saleynayo sinaan la xaqiiqsan yahay.	
A central aspect of this project was the commitment to respecting The First Voice of African Australian communities, which was critical in identifying:	Wejiga bartamaha ee mashruucani wuxuu ahaa ka go'naanta xushmeynta Codka Koowaad ee bulshooyinka dadka Afrikaanka Australiyaanka ah, kaas oo ahaa wax muhiim ah xagga aqoonsiga:	
<ul style="list-style-type: none"> • the issues • what works and what is not working • achievements and contributions • preferred solutions and suggestions for progressing the issues. 	<ul style="list-style-type: none"> • Arimaha • Waxa shaqeynaya iyo waxaan shaqeynaynin • Wax ka geysiga iyo waxyaalaha la gaarey • Xallalka la doorbidayo iyo fikrad soo jeedinta arimaha socda. 	
The project compendium provides a comprehensive record of the outcomes of the national consultation process, with strong emphasis on The First Voice of African Australian communities. Visit www.humanrights.gov.au/africanaus/compendium/	Akhbaarta mashruuca wuxuu bixinayaa diiwaanka natiijada waxyaalo badan oo ka koban nidaamka la tashiga qaranka, oo xoog badan saareysa Codka Koowaad ee bulshooyinka Afrikaan Australiyaanka ah. Gal www.humanrights.gov.au/africanaus/compendium/	
Key issues	Arimaha muhiimka	Somali-File4.mp3
<i>The big problem is that, even if there is work or even if there is some houses, it is people and how they think about Africans, that is a bigger problem. We get told that we cannot be trusted, that we are lazy. This is much harder to fight than looking for houses.</i> Community consultation, South Australia	Dhibaatada ugu weyni waxay tahay, xitaa haddii ay jirto shaqo ama xitaa haddii ay jiraan guryo, waa dadka iyo siday u maleynayaan inay Afrikaanku yihiin, kaas ayaa ah dhibaatada ugu sii weyn. Waxaa naloo sheegaa inaan nalagu kalsoonaan karin, inaan nahay dad caajisloowyaal ah. Taasi aad ayey uga sii dhib badan tahay in lala dagaalamo marka loo eego raadinta guryaha La tallashiga bulshada, South Australia	
People who took part in the consultations and those who made submissions highlighted a number of barriers to the successful settlement and inclusion of	Dadka ka qaybqaatey la tashiga iyo kuwa wax soo gudbiyeyba waxay dusha ka xariiqeen inay jiraan tiro waxyaalo hortaagan ay jiraan si guul leh u	

African Australians, particularly because of 'visible difference'.	degitaanka iyo bulsho ku darida dadka Afrikaanka Australiyaanka ah, gaar ahaan sababtoo ah 'kala duwaanaanta muuqata awgeed'.	
There was widespread agreement by community members, service providers and stakeholders that African Australians experience widespread discrimination – both direct and indirect – in relation to employment, housing, education, health services and in connection with the justice system.	Waxaa jiray heshiis faafey iyo xubnaha bulshada, adeeg bixiyayaasha iyo kuwa daneeya in waxyaalaha ay la kulmeen dadka Afrikaanka Australiyaanka ahi ay tahay kala soocitaan faafey – oo labadaba ah mid toos ah iyo mid aan toos ahaynba – waxa la xiriira shaqada, guriyeynta, waxbarashada iyo adeegyada caafimaadka iyo waxyaalaha la xiriira nidaamka caddaalada.	
Regardless of whether they arrived as migrants, refugees or humanitarian entrants, and whether they had been here for a short time or their whole life, many said they experienced discrimination and prejudice as part of their everyday lives.	Iyadoo aan loo tixgelinayn inay u yimaadeen si soogalooti ah, qaxooti ama kuwa ku soo galay caawimaada bani'aadanimu inay halkan joogeen wakhti gaaban ama noloshooda oo dhan, kuwo badani waxay yiraahdeen kala soocida ay arkeen iyo naceybka waa qayb ka mid ah nolol maalmeedkooda.	
In fact, many African Australians felt it was the key factor that undermined their rights as equal citizens:	Xaqiiq ahaantii, kuwo badan oo ah Afrikaanka Australiyaanka waxay dareemeen waxay ahayd qodob muhiin ah oo mijo xaabiyey xuquuqdooda sidii wadaniyiin siman:	
<i>You start to feel that you have no place in this new land and you wonder what the experiences of your children will be as they grow up, and perhaps also find that the colour of their skin is the only reason that they will not be seen by some as belonging here. This is what I mostly fear.</i> Community consultation, NSW	Waxaad bilaabeysaa dareenka ah inaad meel ku lahayn dhulkan cusub waxaanad la yaabeysaa waxay noqon doonto waxay soo maraan carruurtaadu markay koraan, lacala sidoo kale markay ogaadaan in madowga jirkoodu inuu yahay sababta kaliya ee qaar ugu arki doonin inay halkan leeyihiin. Tani waa waxaan badanaa ka baqo. La tashiga bulshada, NSW	
Stakeholders identified issues around the provision of services, especially service quality and service gaps, as major barriers to social inclusion for newly-arrived African refugees and humanitarian entrants.	Dadka daneeya waxay ogaadeen arimaha ku hareereysan bixinta adeegyada, khaas ahaan tayada adeega iyo waxyaalaha u dhaxeeya adeega, waxa ugu weyn ee ka hortaagan bulsho ku darida qaxootiga Afrikaanka ah ee dhawaan yimid iyo kuwa	

	bani'aadanimada ku soo galay.	
In contrast, a major concern of community members was the 'appropriateness' of services offered to African Australians. A number said that culturally inappropriate services and interventions created confusion and tensions and, in some instances, inadvertently undermined families.	Marka la barbardhigo, waxyaalaha ugu weyn ee ay saluugsan yihiin xubnaha bulshadu waxay ahayd ' ku haboonaanta" adeegyada la siiyo Afrikaanka Australiyaanka ah. Tiro ayaa tiri in adeegyo dhaqan ahaan aan ku habooneyn iyo kala dhexgalada ayaa ku abuurey wareer iyo dareen iyo xaalladaha qaarkood, si aan wanaagsaneyn u mijo xaabiyey qoysaska.	
African Australians said that targeted education programs on the backgrounds, culture and diversity of their communities, and the pre-arrival experiences of refugees, would greatly assist service providers and others working with their communities.	Afrikaanka Australiyaanka ah waxay yiraahdeen in barnaamijyada waxbarasho ee la beegsanayo ee asalada, dhaqanka iyo kala duwanaanta bulshooyinkooda, iyo inteysan iman ka hor dadka qaxootiga ahi, ayaa si weyn u caawinaya adeeg bixiyayaasha iyo kuwa kale ee la shaqeeya bulshooyinkooda.	
More broadly, there was a need identified to involve African Australian communities as genuine partners in the development and delivery of programs and services.	Si aad u ballaadhan, waxaa jirtay baahi loo ogaaday inay ku lugleedahay bulshooyinka Afrikaanka Australiyaanka ah sidii shirko dhab ah xagga horumarinta iyo bixinta adeegyada iyo barnaamijyada.	
Community members, service providers and stakeholders also made specific suggestions for improvements in the areas of training and employment, education, health, housing and the justice system.	Xubnaha bulshada, adeeg bixiyayaasha iyo kuwa daneynaya ayaa sidoo kale sameeyey tallo soojeedino khaas ah oo loogu talagalay goobaha la hagaajinayo ee tababarka iyo shaqada, waxbarashada, caafimaadka, guriyeynta iyo nidaamka caddaalada.	
The consultations also highlighted a number of other important issues for African Australian communities, including the need to inform, educate and support communities to address issues of child protection and family violence.	La tashiyadu waxay sidoo kale muujiyeen tiro arimo kale oo muhiim ah oo loogu talagalay bulshooyinka Afrikaanka Australiyaanka ah oo ay ka mid yihiin baahida loo qabo in la wargeliyo, waxbaro iyo in la taageero bulshooyinka si ay uga hadlaan arimaha ilaalinta carruurta iyo qalalaasaha qoyska.	
Training and employment	Tababarka iyo shaqada	Somali-File5.mp3

<p>African Australians who took part in the consultations brought with them considerable skills, qualifications and experience. They said they were eager to make a positive contribution to their new home.</p>	<p>Afrikaanka Australiyaanka ah ee ka qaybqaatay la tashiyada waxay keeneen xirafado muhiim ah, aqoonsiyo iyo waayo aragnimo. Waxay yiraahdeen waxaan rabney inaan wax wanaagsan ka geysano gurigeena cusub.</p>	
<p>However, many faced significant challenges when they seek suitable work and training opportunities.</p>	<p>Si kastaba ha ahaatee, kuwo badani waxay la kulmaan loolan weyn markii ay raadiyaan shaqo ku haboon iyo fursadaha tababarada.</p>	
<p>Community members said there was an urgent need to provide more targeted information about the vocational training programs and services available to them. They also noted the need for more intensive support during and after training, as well as training approaches that take account of their needs and backgrounds:</p>	<p>Xubnaha bulshada waxay yiraahdeen waxaa jirey baahi degdeg ah oo lagu bixinayo macluumaad la beegsanayo oo ka badan intaas kuna saabsan barnaamijyada tababarka xirfadaha iyo adeegyada ay heli karaan. Waxay sidoo kale ogaadeen baahida loo qabo taageeraha dhakhsaha badan inta ay socoto iyo tababarka ka dibba, sidoo kale siyaalaha wax loo tababaro ee tixgeliya baahidooda iyo asaladooda.</p>	
<p><i>When you come from a place where the idea of 'training' is somewhat alien, and you learn through doing or oral discussion, then the approaches that are taken just don't seem to work.</i> African Australian settlement worker, Victoria</p>	<p>Markaad ka timaado meel fikrada 'tababar' ay tahay wax aan la arag oo aad wax ku barato wax sameynta ama wadahadalka afka ah, ka dib siyaalaha loo maro ee la qaado uma eka inay shaqeynayaan. Shaqaalaha dejinta Afrikaanka Australiyaanka ah, ee Fiktooriya</p>	
<p>African Australians also said they needed greater support to understand and get the most out of employment service providers. They described the system as complex and overwhelming, with not enough time to help them develop employment pathways or find jobs that matched their skills, interest and experience.</p>	<p>Afrikaanka Australiyaanka ah sidoo kale waxay yiraahdeen waxay u baahnaayeen taageero weyn oo lagu fahmo oo looga helo adeeg bixiyayaasha waxbarashada inta ugu badan. Waxay sharxeen nidaamka inuu yahay mid dhib badan oo ku wareerinaya, oo aan lahayn wakhti ku filan oo caawinaya inay yeeshaan meelihii ay u mari lahaayeen shaqada ama inay helaan shaqooyinka u dhigma xirfadahooda, xiisahooda iyo khibradaba.</p>	
<p>Most community respondents said that front-line staff of employment service providers should receive training to help them better support African</p>	<p>Dadka soo jawaabey ee bulshooyinka badidoodu waxay yiraahdeen in shaqaalaha safka hore ee adeeg bixiyayaasha adeega shaqadu waa inay</p>	

<p>Australians, particularly those who are newly-arrived.</p>	<p>helaan tababar ka caawinaya iyaga inay si fiican u taageeraan Afrikaanka Australiyaanka ah, gaar ahaan kuwa dhawaan yimid.</p>	
<p>They also said it was important that career advisors provided realistic information and that there were opportunities to get practical work experience in Australian workplaces.</p>	<p>Waxay sidoo kale yiraahdeen waa muhiim in mihnad kala taliyayaasha inay bixiyaan macluumaad xaqiiq ah iyo inay jiraan fursado lagu heli karo khibrad barasho shaqo oo ah goobaha shaqada Australiya.</p>	
<p>Many African Australians said that prejudice was one of the greatest challenges to finding and securing employment:</p>	<p>Kuwo badan oo ah Afrikaanka Australiyaanka ah ayaa waxay yiraahdeen in naceybka inuu ahaa mid ka mid ah loolanka ugu weynaa ee shaqo helida iyo adkeysigeedaba.</p>	
<p><i>It was all fine until I turned up for the interview. They didn't expect to see a person with black skin. I knew the minute I sat down that I wasn't going to get the job. Well this was a year ago, and I have had that experience at least six times.</i> Community focus group, South Australia</p>	<p>Waxay ahayd dhammaan wax fiican ilaa aan u imid wareysigii shaqada. May fileynin inay arkaan qof maqaar madow. Waxaan ogaa daqiiqadii aan fadhiistay inaan shaqada helaynin. Waa hagaag tani waxay ahayd sannad ka hor, arintaas oo kalena waxay igu dhacday lix jeer.</p> <p>Kooxda Xoogg saarida ee Bulshada, South Australia</p>	
<p>Community members believed that their accent or having an unfamiliar name caused difficulties in getting interviews. When they attended interviews, many community members felt that employers would be unwilling to give them a job because of visible difference. These barriers were perceived to be further compounded for Muslim African Australians, especially women who wear the hijab.</p>	<p>Xubnaha bulshada waxay rumeysnaayeen in codkoodu ama yeelashada magac aan la aqoon inay sababtay dhibaatan ah helida wareysi shaqo. Markay tageen wareysiyo, xubno badan oo ka mid ah bulshooyinka waxay dareemeen in loo shaqeeyayaasha inaysan dooneynin inay siiyaan shaqo sababtuna tahay kala duwanaan muuqata. Waxyaalahan ka hortaagan ayaa la ogaaday inay aad ugu badan yihiin Afrikaanka Australiyaanka Muslim ka ah, khaas ahaan dumarka xirta hijaabka.</p>	
<p>Women, particularly African Muslims, spoke of feeling generally more vulnerable to exploitation around workplace arrangements. Several women also spoke of their experiences of sexual harassment.</p>	<p>Dumarka, gaar ahaan Afrikaanka Muslimka ah, waxay ka hadleen dareenka guud ahaan inay aad ugu jilicsan yihiin macaamilka aan caddaalada ahayn ee goobaha shaqada. Dhowr dumar ah ayaa sidoo kale ka hadlay dhibka galmo ee ay soo mareen.</p>	

<p>An additional challenge to employment was the difficulty of having overseas qualifications and experiences recognised by employers and professional bodies.</p>	<p>Loolan dheeraad ah oo shaqo wuxuu ahaa dhibaataada ah inay heystaan aqoonsi dibeda ah iyo waayo aragnimo oo ay aqoonsadeen loo shaqeeyayaasha iyo hay'adaha xirfada aqoonta.</p>	
<p>Some community members said they felt ashamed that they could not find a job and parents worried about the effects on their children, especially the possibility of perpetuating intergenerational disadvantage.</p>	<p>Xubmaha bulshada qaarkood waxay yiraahdeen waxaa ceeb la noqday inay shaqo heli kari waayeen waalidkuna waxay ka welwelayeen saameynta ay ku yeelanayso carruurtooda, khaas ahaan suurtoagalnimada socodka jilasha aan furadahan helin.</p>	
<p>Consultations with community participants, service providers and stakeholders identified a number of strategies to better support African Australians to find and keep meaningful employment, including:</p>	<p>La tashiga ka soo qaybgalayaasha bulshada, adeeg bixiyayaasha iyo kuwa daneeya waxay ogaadeen in tiro istaraatiijiyado ah oo lagu hagaajinayo taageerada Afrikaanka Australiyaanka si loo helo iyo in la helo shaqo micno leh, oo ay ka mid tahay:</p>	
<ul style="list-style-type: none"> • specific programs to provide information to new arrivals about the Australian work environment and what Australian employers expect 	<ul style="list-style-type: none"> • barnaamijyo khaas ah oo lagu bixinayo macluumaadka la siinayo soogalootiga cusub oo ku saabsan jawiga shaqo ee Australiya iyo waxa loo shaqeeyayaasha Australiya ay rajeynayaan 	
<ul style="list-style-type: none"> • programs and initiatives to help employers better understand the assets and capabilities of African Australian migrants and refugees. 	<ul style="list-style-type: none"> • Barnaamijyada iyo bilowyada lagu caawinayo loo shaqeeyayaasha inay si ka fiican u fahmaan hantida iyo awoodaha soogalootiga iyo qaxootiga Afrikaanka Australiyaanka ah. 	
<p>Education</p>	<p>Waxbarashada</p>	<p>Somali-File6.mp3</p>
<p>Young African Australians who took part in the consultations said they wanted to learn and to succeed academically. Many wanted to complete tertiary studies and find employment in various professions.</p>	<p>Dhalinyarada Afrikaanka Australiyaanka ah ee ka qaybqaatay la tashiga waxay yiraahdeen waxay doonayeen inay wax bartaan oo ay waxbarashada sare ku guuleystaan . Kuwo badani waxay doonayeen inay dhammeystaan waxbarashada sare oo ay shaqooyin ka helaan mihnado fara badan.</p>	
<p><i>So many of us are getting through and achieving all sorts of things. My brother is now a biochemist and</i></p>	<p>Qaar naga mid ahi way marayaan waxayna gaarayaan waxyaalo fara badan. Wallaalkey hadda</p>	

<p><i>my sister is a teacher. This really shows how determined we are.</i> Youth focus group, Victoria</p>	<p>waa biochemist wallaasheyina waa macalimad. Tani waxay run ahaantii ku tuseysaa siday nooga go'an tahay arintani. Youth focus group, Victoria</p>	
<p>However, many said they encountered prejudice and negative attitudes about their ability to succeed, with a number (especially girls) describing encounters with teachers who told them they "shouldn't aim too high".</p>	<p>Si kastaba ha ahaatee, kuwo badani waxay yiraahdeen waxay la kulmeen naceyin iyo qaab ka soo horjeedsasho ah oo ku saabsan awoodooda ah inay guuleystaan, oo leh tiro (khaas ahaan gabdhaha) oo ay ka horyimaadeen macalimiinta oo ku yiri " ha haweynsan meel sare".</p>	
<p>Newly-arrived students expressed frustration at being placed in classes to match their chronological age, rather than ones that reflected their educational attainment. And if their English-language skills were still developing, many young African Australians said they found the school curriculum very challenging.</p>	<p>Ardeyda dhawaan timid waxay muujiyeen niyad jab ah in lagu darey fasalo u dhigma da'dooda siday isugu xigaan, meeshii kuwo kale oo muujiyey meeshay ka gaari karaan waxbarashadooda. Iyo haddii xirfadahooda Ingiriisku ay weli korayaan, kuwo badan oo ah dhalinyarada Afrikaanka Australiyaanka ah waxay yiraahdeen waxay ku arkeen in manhajka dugsigu yahay mid loolan adag leh.</p>	
<p>They also felt there was a lack of appropriate support at school, including a lack of people who could understand the background and culture of African Australians. Many said they struggled to feel as though they belonged. However, positive support and encouragement from teachers helped boost their confidence and feelings of acceptance:</p>	<p>Waxay sidoo kale dareemeen inaysan jirin taageero ku haboon dugsiga, oo ay ka mid tahay la'aanta dad fahmi kara asalkooda iyo dhaqanka Afrikaanka Australiyaanka ah. Kuwo badani waxay yiraahdeen way halgameen si ay u dareemaan inay halkaan leeyihiin. Si kastaba ha ahaatee, taageero wanaagsan iyo dhiirigelinta macalimiinta ayaa caawisay kalsoonidooda iyo dareenkooda aqbalaadeed:</p>	
<p><i>It makes a big difference when the teacher says to you in front of the other students that you did very well in an assignment. It tells everyone else that you are intelligent.</i> Youth focus group, Tasmania</p>	<p>Waxay sameynaysaa isbedel weyn marka macalinku kugu yiraahdo ardeyda kale hortooda inaad si wanaagsan uga shaqeysay hawl laysu direy. Waxay u sheegaysaa qof kale oo kasta inaad garasho leedahay. Youth focus group, Tasmania</p>	
<p>African Australian parents stressed that they wanted to establish positive ties with schools, which they saw as crucial to their children's educational progress.</p>	<p>Waalidiinta Afrikaanka Australiyaanka ahi waxay adkeynayaan in ay doonayaan inay la sameeyaan xiriir wanaagsan dugsiyada, oo ay arkeen wax</p>	

<p>However, a number said they felt intimidated by the school environment and others experienced language barriers.</p>	<p>muhiimu u ah horumarka waxbarashada carruurtooda. Si kastaba ha ahaatee, tiro ayaa tiri waxay ka dareemeen cabsi jewiga dugsiiga kuwo kalena waxay la kulmeen luuqada oo ku adag.</p>	
<p>African Australian parents also shared very positive experiences and highlighted the importance of schools being open and welcoming, providing information and counselling services in their first language and being invited to run school-based events, including cultural information days for students and other parents.</p>	<p>Waalidka Afrikaanka Australiyaanka ayaa sidoo kale wadaagay waayo aragnimo wanaagsan oo sharxay muhimada dugsiyada oo ah mid furan oo soo dhaweyn leh, oo bixinaya macluumaad iyo adeegyada la tallinta luuqadooda koowaad iyadoo lagu martiqaaday inay maamulaan dhacdooyinka dugsiiga ku saleysan, oo ay ka mid tahay maalmihii macluumaadka dhaqanka ee loogu talagalay ardeyda iyo waalidiinta kale.</p>	
<p>Community members, service providers and educators said that developing a whole-of-sector approach was essential to ensure greater access to education and improved outcomes for African Australian students. They also provided a range of specific suggestions, including:</p>	<p>Xubnaha bulshada, adeegbixiyayaasha iyo barayaasha waxay yiraahdeen in horumarinta tallaabada dhan ee dhinaca waxay ahayd mid muhiim ah si loo hubiyo isticmaalka weyn ee waxbarashada iyo natiijooyinka hagaagay ee loogu talagalay ardeyda Afrikaanka Australiyaanka. Waxay sidoo kale bixiyeen tallooyin khaas ah oo fara badan, oo ay ka mid yihiin:</p>	
<ul style="list-style-type: none"> • allowing students to stay in English language classes until they are ready to move on to mainstream schooling, and increasing resources for language support in primary and secondary schools 	<ul style="list-style-type: none"> • u ogolaaneyshaha ardeyda inay joogaan fasalada luuqada Ingiriiska ilaa ay diyaar u noqdaan inay u gudbaan dugsiyada caaddiga ah, iyo kordhinta ilaha taageerada luuqada ee dugsiyada hoose dhexe iyo kuwa sareba. 	
<ul style="list-style-type: none"> • providing transition programs to improve school readiness and orientation for new arrivals 	<ul style="list-style-type: none"> • bixinta barnaamijyo ka gudbida ee lagu hagaajinayo u diyaar noqoshada iyo wacyi gelinta loogu talagalay dadka dhawaan yimid 	
<ul style="list-style-type: none"> • employing more teachers from African Australian backgrounds 	<ul style="list-style-type: none"> • shaqaaleynta macalimiin badan oo asal ahaan ka soo jeeda Afrikaanka Australiyaanka ah 	
<ul style="list-style-type: none"> • holding more classes in informal community settings and providing more after-school 	<ul style="list-style-type: none"> • Qabashada fasalo intaa ka sii badan oo ah hab bulshadeedka aan tooska ahayn iyo 	

tutoring programs.	iyagoo bixinaya kuwo badan oo ah barnaamijyada wax dhigida ee dugsiiga ka dib.	
A pressing need was identified for schools with refugee students to develop strategies to better connect and communicate with parents from African Australian communities, as well as programs to build greater understanding among teachers and educators about the needs and experiences of newly-arrived refugee students:	Baahi caddaadis leh ayaa la ogaadey inay qabaan dugsiyada leh ardeyda qaxootiga ah si loogu horumariyo istaraatiijiyada si wanaagsan loogu xirayo iyo la halida waalidiinta ka soo jeeda bulshooyinka Afrikaanka Australiyaanka ah iyo sidoo kale barnaamijyada si loo dhiso faham weyn oo u dhaxeeya macalimiinta iyo barayaasha eek u saabsan baahiyaha iyo waayo aragnimada ardeyda qaxootiga dhawaan yimid:	
<i>It is important that schools use people within the community as the experts of their own culture. There is so much around that is delivered about us by people who are not us.</i> Community leader, Western Australia	Waa muhiim in dugsiyadu u isticmaalaan dadka bulshada dhexdeeda ah sidii ay yihiin khubarada dhaqankooda. Waxaa sidoo kale jira wax badan oo nagu saabsan oo ay naga bixiyaan dadka aan anaga ahayn. Community leader, Western Australia	
Health	Caafimaadka	Somali-File7.mp3
African Australians who took part in the consultations highlighted a number of factors that undermined their physical and mental health, as well as their capacity to get the support they needed.	Afrikaanka Australiyaanka ee ka qaybqaatey la tashiga lagu sharxay tiro qodobo ah oo mijo xaabiyey caafimaadkooda dhimirka iyo ka jireed, iyo sidoo kale awoodooda ay ku helayaan taageerada ay u baahan yihiin.	
These were often associated with the settlement process and included feelings of 'culture shock'; changes in food and diet; social isolation; language barriers; and a lack of culturally appropriate health services.	Tan waxaa badanaa lala xiriirinayey nidaamka dejinta oo uu ku jiro dareemada 'shooga dhaqanka' isbedelada cuntada iyo cunnada, ka soocnaanta bulshada, luuqada waxyaalaha kaa hortaagan; iyo la'aanta adeegyada caafimaad ee dhaqan ahaan ku haboon.	
Discrimination, prejudice and racism also had a significant impact on people's sense of well-being:	Kala soocida, naceybka iyo cunsuiryada ayaa sidoo kale ku leh saameyn weyn dareenka dadka iyo fiyoobitaankooda:	

<p><i>If every day you go out on the street and people stare at you, or you are told you cannot get a job because of your skin colour, or your children are told they will not be successful because they are African, then you get sick in your heart and your head.</i></p> <p>Community consultation, NSW</p>	<p>Haddii aad maalin kasta aado wadada oo ay dadku kugu dheygagaan, ama lagu sheego inaad heli karin shaqo sababtoo ah midabka maqaarkaaga, ama carruurta lagu yiraahdo ma guuleysan doonaan sababtoo ah waa Afrikaan, ka dib waxaad ka jiraneysaa qalbiga iyo madaxa. Community consultation, NSW</p>	
<p>Community members, service providers and stakeholders raised specific issues in relation to the health needs of newly-arrived communities, women, young people and people with disabilities.</p>	<p>Xubnaha bulshada, adeeg bixiyayaasha iyo kuwa daneeya waxay soo jeediyeen arimo gaar ah oo la xiriira baahida caafimaad ee bulshooyinka dhawaan yimid , dumarka, dadka dhalinyarada ah iyo dadka iimaha leh.</p>	
